



**Macluumaadka waalidiinta masuulka
ah ee khuseeya Iswidhishka iyo
Iswidhishka oo luuqad labaad ah**

Järfälla Dugsiyada Hoose ee Järfälla



JÄRFÄLLA



Macluumaadka waalidiinta masuulka ah ee khuseeya Iswidhishka iyo Iswidhishka oo luuqad labaad ah

Ku barbaarida dhowr luuqadood waa faa'ido weyn. Caruurta leh aqoon dhowr luuqadood ah waxay u isticmaalaan qaabab kala duwan iyo meelo kala duwan xiiso leh.

Waxa aad u muhiim u ah in dhammaan ardeydu diyaariyaan luuqada Iswidhiska oo qani ah isla markaana kala duwan labadaba hadalka iyo qoraalka. Tani macneheedu waa in qofku awoodo inuu ugu isticmaalo luuqada Iswidhishka qaabab kala duwan meelo kala duwan. U barashada Iswidhiska sida luuqada hooyo iyo u barashada Iswidhishka sida luuqad labaad waa waxyaabo kala duwan. Qofku wuxuu si degdega u qaadan karaa luuqada maalinkasta, laakiin barashada luuqada dugsiga la xidhiidha, waxay u baahan tahay ku celcelin badan.

Waxbarasho ku bixinta Iswidhishka/Iswidhishka luuqad labaad ahaan?

Dugsiga Iswidhishka ah, waxa jira labo maado oo Iswidhish ah: Iswidhishka iyo Iswidhishka oo luuqad labaad ah. Waxa lagu bixiyaa wakhti isku mid ah dhigista labada maadaaba oo fasaladu waxay helaan qiimo isku mida oo waxbarashada saree e dugsiga sare iyo jaamacada ah. Barida maadada Iswidhishku waxay ku saleysan tahay aragti ah in caruurta marhoreba heleen luuqad dugsi oo fiican bilowgii dugsigaba. Tani noqonaysaa inay ugu hadlaan Iswidhishka si faseex ah oo u yaqaanaan luuqada si wanaagsan dhanka dhawaqa iyo naxwaha. Fahamka dheeraadka ah ee luuqada iyo erayada ee loo diyaariyey da'da ayaa sidoo kale la filayaa.

Cilmi-baadhista manta ayaa muujisay in qaabka ugu waxtarka badan ee lagu barto luuqadu tahay in wax barida iyo shuruuduhu aad ugu dhow yihiin heerka luuqada intii macquula, oo ardeyga si joogto ah loogula dadaalo heerka ka sareeya halkaasi. Ardeyga ay ku xeeran yihiin luuqado aad uga sareeya heerku kuma diyaarin karo isla xaaladaasi, oo sidaasi darteed waxa muhiima in dugsigu bixin karo heerka wax dhigista ee saxda ah oo waafaqsan shuruuda qoraalka, hadalka, dhageysiga iyo akhriska.

Sidee ayaa barida Iswidhishka oo luuqad labaad ah loo nidaamiyey?

Si loo siiyo Iswidhishka oo luuqad labaad ah, ardeydu waa inay kasoo jeedaan mid ka mida saddexdan qeybood ee ardeyga:

- Ardeyda luuqadooda hooyo aanay ahayn Iswidhish.
- Ardeyda luuqadooda hooyo tahay Iswidhish, ee la geeyey dugsiyo dibada ah.
- Ardeyda muhaajiriinta ee ka dhigtay Iswidhishka luuqadooda ugu muhiimsan ee wada xidhiidka waalidka masuulka ah.

(Xeerka Dugsiga SFS 2011:185, Cutubka 5, Qeybaha 14–15)

Barida Iswidhishka oo luuqad labaad ah waxa loogasoo agaasimi karaa qaabab kala duwan dugsiyada dawlada. Waxay u dhici karaan si gaara, kooxo kooban ama fasal dhammeystiran. Agaasinka waxa lagu go'aamiyaa iyadoo lagu saleynayo baahiyaha ardeyga. Barida Iswidhishka oo luuqad labaad ah waxay ku saleysan tahay codsiyada hore ee ardeyga baranaya luuqada.

Sidee ayaa dugsigu u go'aamiyaa in ilmahaygu u baahan yahay Iswidhish luuqad labaad ahaan?

Dugsiga, waxaanu si joogto ah u dabo galnaa horumarinta luuqada ardeyga. Waxaanu haysanaa agab iyo qaabab kala dwan oo aan u isticmaalno inaan ku helno macluumaad aan go'aan ku qaadano. Maamulaha ayaa leh go'aanka kama danbeysta ah ee in ardeygu baran doono Iswidhish ama Iswidhishka oo luuqad labaad ah.

Mudo intee leeg ayaa ilmahayga la bari doonaa Iswidhishka oo luuqad labaad ah?

Waxbarashadu waxay socotaa ilaa inta dugsigu u tixgalinaayo inay wali jirto baahi Iswidhish oo luuqad labaad ah. Ardeyda qaar ayaa u baahan waxbarashada Iswidhishka oo luuqad labaad ah dhammaan sanad dugsiyoodkooda. Qaar kale ayaa u baahan mudo gaaban. Baridu kuma adkaan karo maadooyinka Iswidhishka isla markaana.

La xidhiidh dugsiga ilmahaaga wixii macluumaad dheeriya.